

MAWDUUC: Cusbooneysiinta Nidaamka Aqbalaada Dugsiyada Imtixaanka ee SY 2021-2022

Bulshada Qaaliga ah ee BPS,

Waxaan u qoreynaa inaan kula wadaagno macluumaadka kusaabsan nidaamka aqbalida dugsiyada imtixaanka ee sanad dugsiyeedka 2021-22. Laga soo bilaabo Oktoobar ee 2020, BPS waxay ururiyeen oo xaqiijiyeen macluumaadka arday kasta oo ku nool magaalada Boston ee u-qalma gelitaanka dugsiyada imtixaanka. Sidii aan horey u soo sheegnay, nidaamka aqbalaada ee halka sano ah waxay u baahan tahay uruurinta macluumaad aad uga badan sanadihii hore. Hadafkeenu waa inaan xaqiijino nidaamka gelitaanka ardayda oo dhan oo cadaalad ah. Hoos waxaad kaheleysaa macluumaad kusaabsan sida BPS ay ufuliyeen nidaamka aqbalaada sanadkan.

Waqtiga Codsiga iyo Hawsha:

Guddiga Dugsiyada Boston wuxuu oggolaaday soo-jeedinta Kooxda Shaqada Shuruudaha La-talinta Dugsiyada Imtixaanka Oktoobar 21, 2020. Si loo hubiyo in qoysaska iyo ardayda si buuxda loogu wargaliyay nidaamyada cusub iyo sidoo kale dhammaanba imtixaan kasta oo dugsiyada bixiyo., 16 [dalwada macluumaadka kalfadhiyada](#) waxaa la qabtay intii u dhexeysay Nofeembar ilaa Diseembar 2020.

Ardayda BPS-ahayn

Nidaamka codsiga dugsiyada ee imtixaanka BPS ayaa la bilaabay Nofeembar 23, 2020, wax yar uun ka dib markii Guddiga Dugsiyada Boston ay oggolaadeen soo-jeedinta Kooxda Shaqada Shuruudaha La-talinta Dugsiyada Imtixaanka. Nidaamka codsiga wuxuu furmay Nofeembar 23, 2020. Markii hore waxaa loo qorsheeyay inuu dhammaado Diisambar 31, 2020, waqtiga kama dambaysta ah ee arjiga waxaa lagu kordhiyay laba toddobaad oo dheeri ah illaa Janaayo 15, 2021, iyadoo loo abuuray daaqad codsi sideed toddobaad ah oo loogu talagalay ardayda aan ahayn BPS. Ka dib Janaayo 15-keeda, BPS iyo iskaashatadeeda dibedda waxay ka shaqeeyeen xaqiijinta u-qalmitaanka codsadaha barkadaha iyo waraaqaha u-qalmitaanka waxaa loo diray qoysaska aan ahayn BPS Maarso 29, 2021.

Ardayda BPS

BPS waxay ogeysiyeen qoysaska BPS badankood inay uqalmayaan Janaayo 7, 2021 oo ay lasocodsiiayaan darajooyinka dugsiyadooda ee la qiyaasayo Janaayo 29-keeda. Si loo siiyo qoysaska BPS isla daaqada sideed usbuuc si ay u buuxiyaan nidaamka

arjiga, waxaan u kordhinay waqtiga ugu dambeeya ee dhamaan qoysaska BPS si ay ugu soo gudbiyaan darajooyinkooda dugsiga bisha Maarso 5, 2021. BPS waxay kula soo xiriireen kordhintaan wicitaano toos ah qoysaska BPS ee xaqa u leh ma aysan ku kala saarin dugsiyada waqtigii loogu talagalay. Qoysaska ardayda kale ee BPS iyo qoysaska aan ahayn BPS saamayn kuma yeelan kordhintan.

Tiro yar oo ardayda BPS ah ayaa haystay qoraalo u baahan turjumaad, diiwaanada ardayga oo aan dhammeystirneyn oo laga soo qaaday dugsiyadii hore, ama kiisaska u baahnaa ficil dheeri ah ka hor inta aan la buuxinin u-qalmitaanka. Ardayda ka timid BPS ee ka yimid dugsiyada ka baxsan degmada, waxaan la xiriirnay dugsiiyo kala duwan iyo maamulayaasha degmada si ay u soo ururiyaan buundooyin ama aan uga codsano buundooyin loo badalay dugsiyada isticmaalay qaabab kala duwan oo aan aheyn dhaqan.

BPS waxay go'aamiyeen u-qalmitaanka ardayda BPS badankood waxayna u direen waraaco u-qalmitaanka, iyadoo lagu saleynayo heerarka, maadaama go'aannadaas la sameeyay. Si kastaba ha noqotee, markii aan dib u eegis ku sameyneyno nidaamka oggolaanshaha annaga iyo iskaashatadeena dibadda, BPS waxay weli ka shaqeynayaan inay xaqiijiyaan u-qalmitaanka in yar oo ka mid ah ardayda dhigata dugsiyada BPS. Waxaan si dhow ula shaqeyneynaa hogaamiyaasha dugsiga si loo hubiyo darajooyinka ardayda sida ugu dhaqsaha badan.

Ardayda Dhamaan

Waqtigaan, waxaan rajeyneynaa inaan dirno casuumaadaha dugsiga imtixaanka dhexda Abriil ilaa dhammaadkeeda. Waxaan ka cudurdaaraneynaa wixii dhib ah ee dib-u-dhacaasi keenay, waana sii wadeynaa inaan idinla socodsiino wixii macluumaad ah ee suurtogalka ah Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan gelitaanka dugsiga imtixaanka, fadlan booqo www.bostonpublicschools.org/exam

Si daacad ah,
Adeegyada Soo dhaweynta BPS